

## **ORAVAISTEN SUOMENKIELEN KOULU**

### **SIDA WANNAAGSAN EE XEERARKA WAAFAQSAN**

Ardayga had iyo jeer waxaa laga rabaa :

- inuu si fiican u dhaqmo oo ixtiraamo ardaydayda kale, macallimiinta iskuulka, dadka iskuulka ka shaqeeya, darwaliinta wada baabuurta iskuulka, iyo dadka iskuulka soo booqdaba ama martida ku ah.
- inuu xannaaneeyo oo ka taxadaro alaabada iskuulka gudihiisa taala iyo tan dibeddaba magdhawna ka bixiyo wixii uu jebiyo
- wixii loo sheego si fiican u qaato oo weliba aqbaloo si fiicana u qabto wixii la yiraahdo qabo
- inuu wakhtiyada la leeyahay bireega (biririfta) uu u baxo bannaanka, haddii aanay jirin wax kale oo sababaya in gudaha la joogo, sida micallimiinta oo amra in la joogo gudaha
- waa inuu xasuustaa, in wakhtiyada ulaha barafka la gashan yahay, ama taagga layska soo taraaraxinayo, baaskiil wadida iyo wixii kale ee la mid ahba waxaa keliya oo lagu samayn karaa meelaha loogu talagalay

Barafka la duuduubo, dhagaxa iyo wixii wax yeelo geysanayaba in la tuuro lama ogola. Lama ogola in la galo ama loo dhow ado meesha loogu talagalay wakhtiga firaaqada la leeyahay ee bannaanka ka dhisan (skeittirampi) saacadaha u dhexeeya 8.00 – 15.15.

Ardaygu xaq uma laha in markaan macallinku jooggin ama uu shirka ku jiro inuu ka maqnaado kulanka subaxda ah, xiisadaha am laylisyada (shaqo guri) ama wixii la mid ahba aan ka ahayn in ardaygu xannuunsan yahay.

Marka la xannuunsado ee galaaska laga maqan yahay waa in sida ugu dhakhsaha badan loola socodsiiya macallinka.

Sharciga Finland wuxuu dhigayaa in marka baaskiilka la wado la gashado koofiyadda loogu tala galay baaskiilka.

Ardaygu wuxuu fasax heli karaa ama maqnaan karaa isagoo waalidku weydiisanayo fasax ah:

- hal xiisad oo macallinka laga qaato
- ugu badnaan laba casho oo macallinka galaaska ka mas'uulka ah laga qaato
- ugu badnaan laba asbuuc oo fasax laga qaadanayo maamulaha iskuulka
- wixii intaas ka badan ee maqnaansho ah waxaa codsi loo qortaa xarunta waxbarashada oo la sii ogaysiyyaa ka hor inta aan la gudo gelin maqnaanshaha.

Ardayga waxaa laga rabaa, in wixii hawl ah ee looga baahan yahay uu qabto oo fuliyo.

Ardaygu iskuulka uma soo qaadan karo nacnac, buskul, iyo wixii la mid ah ee laga yaaabo inay arbushaad geyskaraan. Lacagta iyo wixii kale ee la mid ah iskuulka looma soo qaadan karo. Iskuulku magdhaw kama bixinayo wixii ka yimaada waxyaabahaas, haddii ay lumaan.

Haddii ardaygu jebiyo sharciyada iskuulka, waxaa marka loo eego sharciyada iskuulka u yaal lagu ganaaxi karaa waxyaabaha soo socda:

- shaqo loo diro iskuulku ka dib (ku saabsan waxbarashada)
- fasalka oo laga saaro inta ka hadhay xiisadda
- ciqaab ah in la fadhiisiyo ilaa aba saacaddood
- guriga oo lala socodsiiyo
- waraaq digniin ah
- iskuulka oo laga eryo ilaa 3 billood

Sharciyadan waxaa dejiyey shaqaalahi iskuulka, ansixiyeyna 19.8.2004.

---

### **Qaybtan u soo celi iskuulka**

Waxaan aqbalay oo aan raacayaa sharciyada iyo qawaaniinta u yaala iskuulka , waxaannan qabanayaa shaqdayda (layliksa) una dhaqmaya si wanaagsan.

---

### **Saxeexa ardayga**

Waxaan si wada Jira u baranay sharciyada iyo qawaaniinta iskuulka, waxaan ka caawinayaa ilmahayga inuu fuliyo oo raaco sharciyada iskuulka.

---

### **Saxeexa mas'uulka ka ah**